

Addis Ababa, Itoobiya

Nehassie 12, 2012

## War-fidin

### **Shacabka itoobiya waxay taageersan yihiin wax ka badalka si wax loogu daro luuqadaha dawlada iyo in la xadido xilliga raysalwasaarah, way ku kala qaybsanyihiin isbadalada kale.**

Shacabka itoobiya waxay ayideen wax ka badalka dastuurka wadan si luuqado badan loogu shaqeeyo dawlada faderaalka iyo in lagu xadido xilliga raysalwasaarah laba(2) xilli sida daraasaad cusub oo Afrobarometer ay samaysay sheegayo.

Inta badan dadka lawaraystay ayaa yidhi waa in dastuurka wax laga badalaa, halkii laga wada badli lahaa ama sidan lagu dayn lahaa\_ si loogu jawaabo shacabka waana in lala tashadaa muwaadiniinta mudada howlaha did u eegista dastuurku socoto.

Inta badani waxa kale oo ay taageereen in luuqado badan looga shaqeeyo federalka\_ ahmariguna ku jiro. In dawlada federalku dhaqan galisoku xadidida wakhtiga raysalwasaaraha laba xilli iyo in la aasaaso maxkamad dastuur oo ka duwan golaha federation ka.

Daraasaadku wuxuu shaaca ka qaaday taageero yaal cimlaaq ah iyo diidanayaa badan marka laga hadlayo wax ka badalka dastuurka oo markii hore ahaa muran u dheexya siyaasiyiinta. Arimaha la isku hayo waxaa ka mid ah kasaarida dastuurka Qodobka 39 oo iftiiminaya xuquuqaha qaramaha, qoomiyadaha iyo shucuubtu aayo ka tashigooda, in lahaanshaha dhulku ay noqoto xuquuqda shakhsiyaadka iyo ka saarida calanka qaranka xidigta dhexda kaga taal.

Natijada daraasaadku waxay quudindoontaa dooda socota ee ku saabsan arimaha siyaasadeed ee kasoo cusboonaaday dastuurka itoobiya. Labadii sano ee u danbeeyey waxaa lagu xasuusta soo noqoshadii codadka mucaaradka ee ku dhawaaqayey wax ka badalka dastuurka iyo xorka dhigida warbaahinta. Arintan dastuurka ku saabsan ayaa dhalisay dood badan oo ay ka qaybkaa danayeen bahda siyaasadu.

### **Waxyaabaha la ogaaday**

- Todoba ka mid ah 10 kasta oo dadka itoobiya ka mid ahi (69%) waxay taageereen wax ka badalka dastuurka, halka kaliya 11% ay rabaan in la xoro lana badlo dhamaan dastuurka. 18% na waxay sheegeen in sidiisa lagu daayo dastuurka(Jaantus 1).
- Wax ka badalka dastuurka eey ay ayideen inta badan lawaraystayashu waxa ka mid ah (Jaantus 2):
  - In la kordhiyo luuqadaha looga shaqeeyo dawlada heer federal(73%).
  - In lagu xadido xilliga raysalwasaaraha laba xilli (68%).
  - in la aasaaso maxkamad dastuuri ah oo ka duwan golaha federation ka oo hada iyagu leh awooda turjumaada dastuurka.
- Wax kabadalada inta yari taageertay waxa ka mid ah
  - Afar 10 kasta oo dadka itoobiya ka mid ahi(43%) waxay taageereen asaarida dastuurka Qodobka 39 oo iftiiminaya xuquuqaha aramaha, qoomiyadaha iyo shucuubtu aayo ka tashigooda, goosashada iyo

aasaasida dawlad goboleedkooda. Laakin kala badh(50%) dadka itoobiya ka mid ahi waxay rabaan in Qodobka 39 sidiisa lagu daayo.

- Lawaraystayaashu si isku dhawbay ugu kala qaybsameen in labadalo(46%) iyo in la daayo (49%) qodobada dastuurka ee ka hadlaya in dhamaan dhulka dawladu lahaato halkii shakhsigu ka lahaan lahaa.
- Wax ka yar afar 10 kasta oo dadka itoobiya ka mid ah(37) ayaa raba in calanka qaranka laga saaro xidigta dhexda kaga taal, halka inta badan (52%) ay kasoo horjeesteen in laga saaro.
- Kaliya sadex meeloodow hal meel(35%) dadka lawaraystay ayaa qaba in Addis Ababa noqoto mid ka mid ah deeganada federaalka; Inta badan(54%) way kasoo horjeesteen fikirkaa.
- Dadka itoobiya way ku kala qaybsanyihiin xilliga wax ka dib u eegista iyo badalka dastuurka: sadex meeloodow(34%) waxay sheegeen in arintani dhacdo ka hor doorashada heer qaran, halka in ku dhawina qabto in la qabto doorashada wax yar ka dib. (29%) ayaa qaba in dib u eegista dastuurku dhacdo ugu yaraan hal sano ka dib doorashada(Jaantus 3).
- Inta ugu badan (92%) lawaraystayaasha ayaa leh waa in muwaadiniinta caadiga ee itoobiya waa in lala tashadaa wakhtiga howlaha dib u eegista dastuurku socoto. Kaliya 7% ayaa qaba in hawshaasi loo dhaafo siyaasiyiinta la dooratay(Jaantus 4).

### **Daraasaadka Afrobarometer**


Afrobarometer waa Afrikaanistayaal, shabakad daraasaad oo dhexdexaad ah. Waxa laga helaa xog lagu kalsoonayahay oo ku saabsan khibrada afrika iyo qiimaynta dimuqraadiyada, maamulka iyo nolol tayo leh. Todoba wareeg oo daraasaad ah ayey ka samaysay 38 wadan intii u dhexaysay 1999 iyo 2018.

Wareegii 8<sup>aad</sup> oo laqabanayo 2019/2020 ayaa la qorsheeyey in laga sameeyo ugu yaraan 35 wadan. Afrobarometer waxay samaysaa waraysiyo foolka-ka fool ah oo ku baxaya luuqada lawaraystuhu doorto iyadoo matalaada qaramada laga soo xulo.

Iyadoo taageero ka helaya Freedom House, Kooxda Afrobarometer ee Itoobiya oo ay hogaaminayso ABCON – Research & Consulting, waxay waraysatay 2,400 dadka qaangaadhka ah ee itoobiya December 2019 iyo January 2020. Matalaada xajmigaa leh waxay soo saartay natiijo heer qaran ah iyadoo la isticmaalayo a margin of error of +/-2 percentage points at a 95% confidence level. Daraasaad hore ayaa laga qabtay itoobiya sanadii 2013 kii.

## Jaantusyada

### Jaantus 1: Dastuurka itoobiya sidiisa maloo daaya, wax kabadal malagu sameeya mise waaba lawada xooraa oo la badalaa? | Itoobiya | 2020



**Lawaraystayaasha ayaa la waydiiyey:** midkeed odhaahyadan ayidsantahay?


**Odhaahda 1:** dastuurka hada ee itoobiya sidiisa haloo daayo; baahi looma qabo in waxka badal iyo badaltoona la sameeyo.

**Odhaahda 2:** dastuurka hada ee itoobiya hala daayo, laakiin waxkabadal halagu sameeyo si uu uu ula jaanqaado baahiyaha wakhti xaadirkan

**Odhaahda 3:** dastuurka hada ee itoobiya hala xooro hana lagu badalo mid cusub.

**Jaantus 2: Taageerida ama diidma qorshaha wax ka badalka dastuurka.**

| Itoobiya | 2020



**Lawaraystayaasha ayaa la waydiiyey:** Qorshayaal dhowr ahbaa lasameeyey oo ku saabsan sidii itoobiya wax uga badali lahayd ama u wada badali lahay dastuurka hada jira. Ma taageersantahay ama diidan tahay isbdaladan la qosheeyey ee hoos ku qoran?


- Qodobka 39,oo xaqiijanyey qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta aayo ka tashigooda, ilaa heer goosasho iyo aasaasida dawlad deegaaneedkooda, in laga saaro dastuurka.
- Qodobka sheegay in dhamaan dhulka ay dawladu leedahay in laga saaro dastuurka ama wax laga badalo si muwaadiniinitu xaq buuxa ugu yeeshaan dhulka.
- In laga saaro calanka qaranka calaamada dhexda kaga taal.
- In luuqado kale lagusoo krodhiyo luuqada shaqo ee dawlada federalka.
- In la aasaaso maxkamada dastuuri ah oo ka madax banaan golaha federationka.
- In Addis ababa ka mid noqoto deegaanada federalka.

midkeed odhaahyadan ayidsantahay?

Odhaah 1: dastuurku waa in uu xadidaa in raysalwasaarahu shaqeeyo ugu badnaan laba xilli doorasho.


Odhaah 2: yaanay jirin xad dastuuri ah oo xadidaya wakhtiga raysalwasaarahu shaqayn karo.

**Jaantus 3: Wakhtiga Dib u eegista dastuurka | siday ay qabaan Reer miyi iyo reer Magaal | Itoobiya | 2020**



**Lawaraystayaasha ayaa la waydiiyey:** Haddii dastuurka dib loo eegayo ama wax laga badalayo, Goormaad u malaynaysaa in hawshan la qabto?

**Jaantus 4: Wax ka badalka dastuura mai in muwaadiniinta lagala tashadaa mise waa in loo dhaafto siyaasiyiinta ladoortay? | Itoobiya | 2020**



**Lawaraystayaasha ayaa la waydiiyey:** midkeed odhaahyadan soo socda ayidsantahay?

odhaahda 1: hadii dib u eegis dastuur lasamaynayo si wax ka badal ama wada badal loo sameeyo waa in lagala tashadaa muwaadiniinta caadigaa Itoobiya.

odhaahda 2: Wax kabadalka ama wada badalka dastuurka waa masuuliyada siyaasiyiinta la doortay. Majirto baahi keenaysa in lagala tashado muwaadiniinta caadigaa ee itoobiya.

(% Cidda “ku raacday” amar “aad ula dhacsan” Odhaah kasta)

**Wixii faah faahin dheeraada, fadlan la xidhiidh:**

Mulu Teka  
National Investigator  
ABCON – Research & Consulting  
Tel +251 973 077 414 , +251 115 531 470, +251 115 521 696, +251 115 537 061  
[mulu.mtg@gmail.com](mailto:mulu.mtg@gmail.com) / [info@abconltd.et](mailto:info@abconltd.et)  
Addis Ababa, Itoobiya

Visit us online at:  
[www.abconltd.et](http://www.abconltd.et)  
[www.afrobarometer.org](http://www.afrobarometer.org)

Follow our releases on #Voices Africa.

